MAYOR OF LONDON

# European Londoners Hub (Xarunta Reer Yurub ee London)

Somali/Soomaali

# COPYRIGHT

**Greater London Authority**
**February 2021**

Published by
Greater London Authority
City Hall
The Queen's Walk
More London
London SE1 2AA

enquiries 020 7983 4000
minicom 020 7983 4458

# Sida loo codsado Nidaamka Dejinta Midowga Yurub

Duqa Magaalada London, Sadiq Khan wuxuu caddeeyay in Muwaadinniinta EU (Midowga Yurub) ee ku nool London ay ka tirsan yihiin laguna soo dhaweynayo magaaladeena weyn.

Si loo hubiyo in Muwadiniinta EU iyo qoysaskooda ay helaan dhammaan macluumaadka ay u baahan yihiin ee ku saabsan sida ay London ugu noolaan lahaayeen Brexit kaddib, waxaan sameenay European Londoners Hub (Xarunta Reer Yurub ee London) si aan kuu siino macluumaad cad oo dhexdhexaad ah, iyo haddii loo baahdo, in aan kugu hagno taageero iyo talo dheeraad ah.

## Maxaad ugu baahan tahay inaad codsato?

Sharciyada EU ee Xuriyada Dhaqdhaqaaqa kama sii shaqeyn doonaan UK, sidaa aawadeed dawlada UK waxay waajib uga dhigtay muwaadiniinta EU, EEA, Iswiss iyo qoysaskoodaba, ee damacsan inay si sharci ah usii joogaan UK wixii ka danbeeya 30 Juun 2021, inay codsadaan sharci degganaansho cusub taariikhdan. Tani waxaa loogu wacaa Nidaamka Dejinta EU wuxuuna siiyaa Deganaanshaha Joogtada ah oo ah Joogitaanka Xad Laa’antaa (ILR), ama Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah oo ah Joogitaanka Xadka Leh (LTR) dadka soo codada ee ku guulaysta.

Dawladda UK waxay sheegtay inay filayaan in badi dadka soo codsada ay ku guulaysan doonaan, marka laga reebo dad yar oo lala xiriirinayo xukunnadda fal danbiyeedyo halis ah. Si aad xaq ugu yeelatid Deganaanshaha Joogtada ah markaad codsato waa inaad keentaa caadayta inaad ku noolayd UK muddo shan sano oo isku xigta (degganaansho joogta ah). Hadii soo degtay UK markay ahayd 31 Diseembar 2020 ama kahor balse aadan ku nooleyn halkan 5 sano oo isku xigta marka aad codsaneyso, waxaa lagu siin karaa Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah. Hadaad haysatid Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah, waxaad codsan kartaa Deganaanshaha Joogtada ah kaddib markaad si joogta ah u sii joogtid UK muddo shan sano ah. Hadii lagu siiyo Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah, waxaa muhiim ah inaad codsado Deganaanshaha Joogtada ah kahor inta uusan Deganaanshahaaga Ku Meel Gaarka ah dhicin hadii kale si sharci ah kuma dagnaaneysid UK.

Hadii aad rabto inaad si sharci ah ku sii degnaato UK, waa inaad codsato midkood labada deganaansho kahor 30 Juun 2021.

## Xaq yeelashadada

Waxaan kaa caawin karnaa inaad eegto xaqa aad u leedahay Nidaamka Dejinta EU (EUSS) adiga oo gujinaya badhanka hoose kana jawaabaya dhowr su'aalood oo fudud. Jawaabahaaga waxay naga caawin doonaan inaan kuu tilmaamno macluumaad dheerad ah, hadii ay habboon tahayna, bogga codsiga ee Xafiiska Arrimaha Gudaha. Hadii aad haddaba sii ogtahay inaad xaq u leedahay, waxaad toos u tagi kartaa bogga codsiga.

## Maxaa kale oo aan u baahanay inaan ka ogaado codsashada EUSS?

Waxaad heysataa ilaa iyo 30 Juun 2021 inaad ku codsato EUSS, si kastaba ha ahaatee, waxaan kugula talineynaa inaad dhaqso codsato. Waxaa laga yaabaa in Xafiiska Arrimaha Gudaha uu wali sii tixgeliyo codsiyada la qabto kaddib 30 Juun 2021 hadii ay jirto sabab la qaadan karo oo aad u codsan weyday kahor 30 Juun 2021.

Xubnayaasha qoyskaaga xaqa u leh ee aan hadda joogin UK ayaa codsan kara xilli walba kadib markuu dhamaado Xilliga Kala Guurka si ay kuula soo degaan UK.

Hagiddan soo socota waxay kaa caawin kartaa inaad wax ka ogaato xaaladdaada degenaansho iyo waxa adiga iyo xubnaha qoyskaaga aad u baahan tihiin si aad u buuxisaan codsigiina.

Waxaan si joogta ah macluumaad cusub ugu soo kordhin doona xaruntan isla marka aan ka warhelno wax isbeddel ah.

## Ma codsan karaa Deganaanshaha Joogtada ah ama Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah?

Hadaad si joogta ah ugu nooleyd UK muddo shan sano ah, waad codsan kartaa Deganaanshaha Joogtada ah. Si aad u noqoto qof si joogta u degnaa waa inaad degneed UK ugu yaraan lix bilood muddo 12-bilood dhexdeeda ah inta lagu jiro 5-ta sano. Marki la gudo galo habsocodka codsiga waxaa lagu weydiin doonaa inaad sugtid aqoonsigaaga, oo aad soo gudbiso caddaynta muddada aad joogtay UK iyo inaad qirato wixi dembi ah ee aad gashay. Inta lagu jiro 5-ta sano ee degenaanshaha aad xaqa u yeelaneyso waxaa laguu oggolyahay hal safar inaad kaga maqnaato UK oo lix bilood ka badan hadii ay tahay hal maqnaansho oo aan ka badaneynin 12 bilood "sabab macquul' ahna ay ka danbeyso. Sababaha macquulka ah waxaa loo qeexaa si kooban, waxaana kamid ah uurka, dhalmada, jirrada daran, akhriska, tababar xirfadeed ama shaqo dibedda laguugu diro. Maqnaanshaha uu sababay Coronovirus ayaa loo tixgelin karaa sabab macquul ah, balse kaliya xaalado kooban. Ka akhriso boggeena waxyaabaha ku saabsan deggenaanshaha joogtaada ah si aad wax badan uga ogaato.

Maqnaansho kasta oo aad uga maqnaato UK sababo la xiriira adeeg militari ama Adeegga Boqortooyada Ingiriska wax uma dhimi doono xaq u yeelashadaada degenaanshaha xitaa hadii uu maqnaanshaha ka bato 12 bilood.

Haddaad degganayd UK wax ka yar shan sano markay dhamaato Diseembar 2020, waxaad codsan kartaa Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah. Markaad gaarto degganaansho shan sano oo joogta ah, ayaad waxaad codsan kartaa Deganaanshaha Joogtada ah.

## Ka warran haddaan haddaba haysto Degganaansho Rasmi ah ama Joogitaanka Xad Laa’anta ama Gelidda Xad Laa’anta?’

Deganaanshaha Joogtada ah waa nooc cusub oo kamid ah Joogitaanka Xad Laa’anta ee nooca dadka la siin jiray waa hore. Dadka haddaba heysta Joogitaanka Xad Laa’anta ama Gelidda Xad Laa’anta (ILR/E) ee UK waxay haddaba fasax u heystaan inay ku noolaadaan

UK kadib dhammaadka Xilliga Kala Guurka. Hase ahaatee, waxay rabi karaan inay dalbadaan Deganaanshaha Joogtada ah si ay ugu fududaato inay helaan xuquuqaha siyaadada ah ee hoos yimaada Heshiiska Ka Bixidda, sida xaqa maqnaanshaha shanta sano ama xaqa ku biirista xubnaha qoyska ee buuxiya shuruudaha. Waxaa laga yaabaa in dadka qaarkood ay u sahlanaato inay muujiyaan xaqooda deggenaanshaha markay haysataan Deganaanshaha Joogtada ah kaas oo dijitaal ah oo waqti kasta la heli karo. Nooci hore ee IRL waxaa badanaa lagu dhejiyaa baasaboorka duuuga ah kaas oo nasiib darro dhumi kara.

Dadka haysta dukumiinti ama kaar ansax ah oo Degganaansho Rasmiga ah waa inay codsadaan Deganaanshaha Joogtada ah, maadaama uu Degganaanshaha Rasmiga ah noqonayo mid aan ansax ahayn wixii ka danbeeya 30 Juun 2021. Inkasta oo xaalada degenaanshaha ay noqon doonto mid aan ansax ahayn, dukumiintiga sikasta ay ahaataba wuu ku anfici karaa maadaama ay muujineyso cunug kasta oo kuugu dhashay UK kadib markaad heshay degenaashaha rasmiga ah waxay si ootomaatig ah ku yihiin Muwaadiniin British ah. Xilliga codsashada waxaad sheegi kartaa inaad haysatid ILR/E ama Deggenaanshaha Rasmiga. Waa inaad sheegtid inaadan UK ka maqnayan wax muddo ah oo ka badan 2 sano hadii aad heysatid ILR/E ama 5 sano hadii aad heysatid dukumiintiga ama kaarka Degganaanshaha Rasmiga ah. Inta badan uma baahan doontid inaad caddaysid muddada aad joogtay UK kadib marka aad hesho ILR/E ama Degganaansho Rasmiga ah.

Hadii aad haysatid Joogitaanka ama Gelidda aan Xadka Lahayn balse aadan keeni karin caddayn, tusaale ahaan hadduu kaa lumay dukumiintigaaga ama aad baab'isay sababo darteed, aadna timid UK ka hor 31 Diseembar 1988, waxaad dooran kartaa inaad ka dalbato midkood nidaamka hoos yimaada Qorshaha Windrush ama Qorshaha Dejinta ee EU. Balse waa inaad hubsato inaad midkood dalab ka gudbiso si aad isku ilaaliso.

Haddaadan hubinin xuquuqahaaga, mar walba raadso talobixin sharciyeed oo madax banaan. Macluumaadka diyaarka kuugu ah London waxaad ka heli kartaa bogga taageridda adeegyada.

## Tani sidoo kale miyay qusaysaa Muwaadiniinta Irish-ka?

Muwaadiniinta Irish-ka waxay ku haystaan xuquuq degganaansho oo gaar ah dalka UK taas oo aan ku xirnaan jirin xubinnimada Ingriiska ee EU, waxaana loo tixgeliyaa dad 'degganaasho leh' laga bilaabo marka ay soo degaan UK. Loogama baahan doono inay codsadaan deganaashaha cusub ee nidaamka EUSS hoos yimaada, inkastoo ay codsan karaan hadii ay u baahdaan.

Xubnayaasha qoyska ee muwaadiniinta Irish-ka ee aan ahayn Irish, British ama aanan haysan ILR/EE waxay u baahan doonaan inay cosdaaan Deganaanshaha Joogtada ah ama Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah si loo xaqiijo inay sharci ku degnaadaan UK. Xubnayaasha qoyska ee Muwaadiniin Irish-ka ah ee xaqa u leh ee deggan UK ayaa awood u yeelan doona inay qaataan Deganaanshaha Joogtada ah ama Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah ee lagu helo nidaamka EUSS, iyada oo uu muwaadinka Irish-ka uusan sidaas saamaynin.

## Carruurta miyay u baahan yihiin inay codsadaan?

Xubnaha qoyska oo dhan waxay u baahan yihiin inay si gaar ah u codsadaan, inkastoo waalidiinta ama mas'uuliyiinta ay tahay inay u buuxiyaan codsiga carruurta ay mas'uulka ka yihiin. Carruurta da'doodu ka yar tahay 21 sano ee waalidkoodu haysto Deganaanshaha Joogtada ah, ayaa xaq u yeelan doona Deganaanshaha Joogtada ah markay codsadaan, xitaa haddii ay ku noolaayeen UK in ka yar shan sano. Tani waxay xitaa qusaysaa carruurta yimaada UK wixii ka danbeeya 31 Diseembar 2020.

Codsiyada carruurta la xanaaneeyo waa inay soo gudbiyaan maamulka mas'uulka ka ah daryeelkooda. Cunug ku jira daryeelka maamulkiisa deegaanka wax ka badan 24 saacadood waxaa loo yaqaanaa cunuga la xanaaneeyo.

Carruurta ku dhashay UK ee waalidkooda mid kamid ah uu yahay muwaadin UK, ama haysto Degganaanshaha Rasmiga ama Deganaanshaha Joogtada ah markay dhashaan waa muwaadiniin British ah, umana baahna inay dalbadaan dhalasho ama is diiwaangeliyaan. Qaar ka reeban arrintan ayaa jira. Waxaad heli kartaa macluumad dheeraad ah oo ku saabsan hadii ilmuhu uu horey ka noqonayo British.

Carruurta la korsaday waa in laga keena dukumiinti korsasho sharci ah oo laga aqoonsan yahay UK. Ilamaha dhasha ama la korsado kaddib 31 Diseembar 2020 ayaa sidoo kale la illaalin doonaa.
Akhri tusaalooyinka sida nidaamka Deganaanshaha Joogtada ah iyo Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah ay u kala quseeyaan qoysaska kala duwan.

## Ka warran dadka u baahan caawinaad dheeraad ah?

Xafiiska Arrima Gudaha wuu ka warqabaa inay jiraan sababo badan oo ay dadka macluumaadka si sahlan ugu heli karin ama aysan awood ugu lahayn inay fahmaan ama ay isticmaalaan nidaamka EUSS caawinaad la'aan. Waxaa laga yaabaa inaysan kombiyuutar haysan, ama aqoonin sida loo isticmaalo, waxaa laga yaaba inay wax yar un ka fahmaan luqada Ingriiska, inay naafo yihiin ama caafimaad darro kale haysto oo ka hor joogsaneysa inay si sahlan ama caawinaad la'aan u dirsadaan codsiga. Dadka aan isticmaali karin adeegyada internetka, ama ay ku adag tahay, adeeg Dijitaal ah oo Caawin leh ayay heli karaan. Caawimaadda internetka waxaa ku jiri kara caawimaad telefoon, caawimaad qofeed oo laga helo maktabado la xulay ama guriga oo loogu talagalay dadka ay ku adag tahay inay isticmaalaan adeegyada la xusay.

Xafiiska Arrimaha Gudaha wuxuu la tashaday kooxo kala duwan oo matalo jaaliyado kala duwan; hase ahaatee, tani waa arrin welwel gaar ah leh waxaana laga yaabaa in xaaladaha iyo duruufaha gaarka ah ee codsadayaasha ay u baahdaan taageero gaar ah. Xafiiska Arrimaha Gudaha wuxuu haddadan maalgeliyaa 72 urur oo ay ku jiraan qaar ah maamulka deegaanka kuwaas oo soo ogaanaya lana xiriiraya dadka xaqa u leh inay codsi ka dirsadaan EUSS, sidoo kalana siinaya taageero gaar ah marka ay dirsanayaan codsigooda. Tani waxaa ka mid ah dadka la daryeelo, dadka isbitaalka ku jira muddo dheer iyo waayeelka, sidoo kale bulshooyinka safra ee (Roma) iyo kuwa aan lahayn cinwaan cayiman. Duqa Magaalada ayaa sidoo kale maalgelinaya ururo si ay ugu bixiyaan taageeradan London gudaheeda.

Xafiiska Arimaha Gudaha wuxuu leeyahay khadka caawimaada oo gaarka ah iyo adeegyo kale. Hadii aad qabto wax su'aala ah oo ku saabsan codsiga aad gudbisay, waxaad kala xiriiri kartaa Xarunta Xallinta Degganaanshaha ee EU lambarka 0300 123 7379 (gudaha UK) ama lambarka +44 (0) 203 080 0010 (meeshi ka baxsan UK). Faahfaahinta khidmada waxaa laga heli karaa halkan www.gov.uk/call-charges. Waxaad sidoo kale weydiin kartaa su'aal adigoo isticmaalaya foomka gudbinta ee online-ka ah eu-settled-status-enquiries.service.gov.uk.

Waxaan soo uruurinay caawimaad madax banaan iyo adeegyo talo bixin ah oo laga helo London oo laga yaabo inay ku caawiyaan.

### Ka warran haddii aad labo dhalasho haysatid?

Dadkiina u dhashahay Yurub ee sidoo kalana ah muwaadiniinta British-ka, waxaad awood u sii lahaan doontaan inaad heshaan isla xuquuqaha aad hadda heshaan idinka oo aan u baahnayn inaad codsataan Deganaanshaha Joogtada ah; inaad tihiin muwaadin British ah ayaa xaq idiin siineysa inaad ku noolaataan UK waqti aan xad lahayn. Intaas waxaa dheer, waxaa laga yaabaa inaad weli haysan karto xuquuqda laysku raacay ee Heshiiska ka Bixidda – iyada oo ku xiran sida aad ku heshay muwaadinnimadaada British-ka – inkastoo Dawladda UK ayasan weli soo gudbin macluumaadka la xiriira sida dadka labada dhalasho haysta ay u caddayn doonaan inay xaq leeyihiin. Ka eeg qeybta xigta wixii faahfaahin dheeraad ah.

### Ma codsan karaa muwaadinnimada British-ka?

Hadaad haysatid dukumiintiga ama kaarka Degganaanshaha Rasmiga ah ama aad heysatid Joogitaanka ama Gelidda aan Xadka Lahayn, waxaad sidoo kale awoodi kartaa inaad codsato Muwaadinnimada British-ka. Waxaad sidoo kale midan sameyn kartaa markii laguugu deeqo Deganaanshaha Joogtada ah. Inaad isqabtaan qof muwaadin British ah ma ahane waa inaad sugto 12 bilood laga soo bilaabo markaad heshay mid kamid ah xaaladaha degenaansho ee kore kahor inta aadan codsanin. Waxaa jira macluumaad badan oo ku saabsan sida loo codsado Muwaadinnimada British-ka oo ku jira halkan.

Hase ahaatee waddamada kulligood ma oggola in muwaadiniintu ay haystaan basaboor waddan kale, ama xaalado qaas ah oo keliya, marka waxaa laga yaaba inaad lumiso dhalashada aad hadda haysatid hadii aad noqotid muwaadin British ah. Haddaad xaq u leedahay inaad dalbato Muwaadinnimada British-ka, aadna rabtid inaad codsato, waxaa laga yaabaa inay fiican tahay inaad marka hore ka hubiso safaaraddaada inaad haysan kartid baasaboorka waddanka aad u dhalatay iyo shuruudaha lagaa rabo.

### Ka waran xubnaha qoyska ee aan reer Yurub ahayn?

Muwaadiniinta Yurub ee deggan UK markay tahay 31 Diseembar 2020 waxay ku kafaalo qaadi karaan xubnayaasha qoyskooda ee la noola ayaga kahor taariikhdan nidaamka EUSS (tani waxay inta badan noqon doontaa xubnaha qoyska ee aan reer Yurub ahayn) waxaana sidoo kale UK la soo degi kara xubanaha qoyska ee u qalma kuwaas oo aan ku noleyn UK markay tahay 31 Diseembar 2020 ( tani waxay quseysaa xubnaha qoyska ee rer Yurub ah

iyo kuwa aan ahayn). Inkasta oo muwaadiniinta Irish-ka aysan u baahneyn inay nafsad ahaantooda cosdi u dirsadaan EUSS waxay wali kafaalo qaadi karaan xubnayaasha qoyska inay la noolaadaana ama la soo degaan UK iyaga oo muujinaya in la siin lahaa midkood Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah ama Deganaanshaha Joogtada ah hadii ay codsadaan. Waxaa jira sharciyo gaar ah oo loogu talagalay muwaadiniinta British-ka iyo Irish-ka ee ku dashay Waqooyiga Ireland kuwaas oo sidoo kale ku kafaala qaadi kara xubnayaasha qoyska nidaamka EUSS; halkan eeg si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Xubnayaasha qoyska ee xaqa u leh waa xaasaska/seyga, lamaanaha sharciga ah, lamaanaha aan isguursanin (loo yaqaano lamaanaha isku raaga) kuwaas oo xiriirkooda uu jiray ka hor 31 Diseembar 2020. Waxaa sidoo kale kamid ah waalidka iyo ayeeyo/awoowe kugu tiirsan, iyo sidoo kale carruurta 21 sano ka yar ama carruurta kugu tiirsan ee 21 sano ka weyn. Qaar kamid ah xubnaha qoyska balaaran ee aanan ku jirin liiska kore ayaa codsi geysan kara nidaamka EUSS balse kaliya hadii ay ku codsadeen dukumiintiga Xafiiska Arrimaha Gudaha "xubnaha qoyska balaaran" ahaan ka hor 31 Diseembar 2020.

Xubnaha qoyska ka tirsan ee codsanaya waa inuu keeno cadeynta xirirka uu la leeyahay xubnaha qoskooda ee leh dhalashada Yurub ( tusaale ahaan, warqad dhalasho, guur, ama guurka sharciga ah). Caddayntan waa la soo iskaan gareyn karaa waxana lagu soo gudbin karaa foomka codsiga ee onleenka ah. Waxay sidoo kale u baahan doonaan inay keenaan caddeynta aqooonsiga iyo degganaansha UK ee xubnaha qoyskooda hadii aysan wali helin ayagu Deganaanshaha Joogtada ah ama Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah.

Muwaadiniinta reer Yurub ee qaatay dhalashada British-ka oo ay u dheer tahay dhalashadooda Yurub, xaaladaha qaarkood waxay ku kafaalo qaadi karaan xubnayaasha qoyskooda nidaamka EUSS, balse waxey ku xirnaan doontaa xaalada ay ku sugnaayeen waqtiga ay noqonayeen muwaadin British ah. Waxay u baahan doonaan inay adeegsanayeen xuquuqahooda dhaqdhaqaaqa xorta ah ama heshiiska marka ay noqdeen British si ay awood ugu yeeshaan inay kafaalo qaadaan xubnayaasha qoyskooda. Tani waxay sal ku leedahay xukunka Maxkamadda Caddaaladda ee Yurub ee loo yaqaan Lounes.

Kaafalo qaadka xubnaha qoyska ee hoos imaanaya nidaamka EUSS ma khuseeyo Muwaadiniinta British-ka ah kuwaas oo markii dambe helay baasaboorka Yurub (oo uu ku jiro kan Irish), maadaama aysan u soo guurin UK oo aanan loo tixgelnin inay adeegsadeen xuquuqahooda dhaqdhaqaaqa xorta ah ama heshiiska. Waxaa loo tixgelin doonaa muwaadin British ahaan iyyaga oo aan heysanin dhalasho reer Yurub ah ujeedooyin socdaal awgood. Waxay wali kafaala qaadi karaan xubnayaasha qoyska ee aan British-ka ahayn ama Irish-ka ahayn inay kula noolaadaan UK balse waxay hoos imaanayaan Sharciyada Socdaalka ee aan EUSS ahayn.

Hadaadan hubin xaaladda xubnaha qoyskaaga ama dadka kugu tiirsan, waxaad raadin kartaa talo madax banaan. Ururrada London ee laga yaabo inaad u baahato inaad weydiisato talo madax banaan.

**Ka waran Muwaadiniinta EU ee sida ku meel gaarka ah ugu nool dibadda UK?**

Sida ku xusan Heshiiska ka Bixidda ay isla qaateen EU iyo UK, kuwa la siiyay Deganaanshaha Joogtada ah waxay ku noolaan karaan meel ka baxsan UK ilaa iyo shan sano iyaga oo aan lumineynin xaaladooda degenaansho. Muwaadiniinta EU, EEA ama Swiss ee horay ugu noolaa UK shan sano oo isku xigta balse aan hadda halkan ku nooleyn, ayaa sidoo kale xaq u yeelan kara in la siiyo Deganaanshaha Joogtada ah hadii aysan ka maqneyn UK wax ka badan shan sano ilaa marki ugu danbeysan ay halkan degnaayeen (eeg qeybta codsi ka soo dirista dibadda).

Hadii aadan dhameysanin degenaanshahaada shanta sano ee joogtada ah waqti xaadirkan, waxaad u baahan tahay inaad xaqiijiso inaadan 6 bilood ka badan ku maqnaanin meel ka baxsan UK muddo 12 bilood ah oo kasta si aad u hubiso inaadan jabinin muddada deggenaanshahaada joogtada ah ee aad u baaahan tahay si aad xaq ugu yeelato Deganaanshaha Joogtada ah (inaad aad 12 bilood ku soo qaadato dibadda UK hal muddo sababaha macquulka ah ee kor ku qoran aawadood ma ahane). Ka eeg boggeena Deggenaanshahaada Joogtada ah iyo EUSS wixii macluumaad dheeraad ah.

## Muxuu xaalkoodu noqonayaa muwaadiniinta EU, EEA ama Swiss ee imaanaya 31 Diseembar 2020 kadib?

Muwaadiniinta Yurub ee aan joogin UK kahor 31 Diseembar 2020, xuquuqahooda joogitaanka ee UK waxaa lagu tixgelin doona shuruucda cusub ee socdaalka ee la meel mariyay kadib dhamaadka Xilliga Kala Guurka.

Tani ma khuseyso xubnaha qoyska ee ay isku dhawyihiin muwaadiniinta reer Yurub ee leh Deganaanshaha Joogtada ah ama Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah ee jooga UK kuwaas oo la kafaalo qaadi karo si ay ula midoobaan xubnaha qoyskooda sida ku xusan nidaamka EUSS. Ka eeg halkan wixii macluumaad dheeraad ah.

## Sidee baan u codsan karaa?

Nidaamka EUSS waxaa la socda hubinta aqoonsiga oo qayb ka ah codsiga. Qaabka ugu fudud uguna dhakhsaha badan ee lagu dhammaystiro qaybta aqoonsiga ee codsigaaga waa isticmaalka EU Exit: App-ka hubinta dukumiintiga Aqoonsiga, kaas oo hadda laga heli karo labaduba Apple iPhone 7 ama noocyada cusub iyo Android 6.0 iyo wixi ka kore. App-ka waa inuu awoodo inuu iskaan gareeyo baasaboorkaaga wuxuuna akhrin karaa jiibka (chip) xogta bayometrik-ga.

Waxa kale oo jira adeegyo iskaan gareeya dukumiintiga Aqoonsiga oo laga heli karo dhawr xarumood (khidmo ayaa lagaa qaadi karaa)., inkasta oo badankood ay hadda u xiran yihiin Covid-19 awgood.

Qaar kamdi ah codsiyo gaar ah ayaa kaaga baahan kara inaad gudbisid codsi warqad ama waxaad codsan kartaa foomka codsiga warqada ah hadii aadan awoodin inaad ku sameyso codsiga onleen ahaan. Waa inaad la xiriirto Xarunta Xallinta Degganaanshaha ee EU si aad u codsato foomka codsiga warqada ah kaas oo laguugu soo diri doono cinwaanka gurigaaga.

Dadka aan isticmaali karin adeegyada internetka, ama ay ku adag tahay midan, waxaad isticmaali kartaan Adeeg Dijitaal oo Caawin leh si bilaasha ah. Taageerada dijitaalka caawinta leh waxaa ku jiri kara caawimaad telefoon, caawimaada fool ka fool oo laga helo maktabado la xulay ama mida guri ee loogu talagalay dadka ay ku adag tahay inay isticmaalaan midkood adeegyadan ama aanan ku kalsooneyn inay onleen codsi ku gudbistaan.

## Maxaan u baahanahay oo dukumiinti iyo macluumaad kale ah?

Waxaad u baahan doontaa baasaboor ansax ah ama kaarka aqoonsiga ee qaran si aad u codsato. Si aad u isticmaasho app-ka iskaanka lagu qaado ee taleefonka ama adeegyada iskaan gareeya dukumiintiga Aqoonsiga waxaad u baahan doontaa baasaboor ama kaarka aqoonsiga ee qaran oo bayometrik ah. Dokumiintiga bayometrika waxaa ku jira gabal yar (sida kaarka bangiga oo kale) oo ay ku kaydsan tahay xogtaada. Hadii dukumiintigaaga uusan ahayn bayometrig waxay noqoneysaa inaad midan Xafiiska Arrimaha Gudaha ugu dirto boostada, nuqul ayay ka sameesanayan kadibna wey kuu soo celinayaan. Xubnayaasha qoyska ee aan ahayn muwaadiniinta Yurub ma isticmaali karaan app-ka iskaanka lagu qaado ee taleefonka inay heystaan kaarka degenaanshaha oo bayometrig ah ma ahane.

Waxaad u baahan tahay caddaynta degganaansho ee UK, haddii aadan horey u haysan dukumiinti Degganaansho Rasmi ah, ama Joogitaan aan Xad lahayn, ama Gelid aan Xad Lahayn ee UK oo ansax ah. Haddii aad ka bixisid canshuur shaqadaada, aad heshay dheefo ama lacagta hawlgabka ee dawlada, waxaad isticmaali kartaa lambarkaaga Caymiska Qaranka inaad ku caddaysid intaad degganayd UK. Hab-socodka codsiga ayaa si otomaatig ah uga xaqiijin doona lambarkaaga Caymiska Qaranka waaxda HMRC iyo DWP, si loo hubiyo inaad tahay qof degan UK.

Haddii uusan jirin macluumaad ku filan oo ku jira keyd-xogeedyada qaranka, sida HMRC ama DWP, waxaa lagu weydiin doonaa caddaymo kale oo tusinaya deggenaanshahaaga joogtada ah. Tani waxaa kamid noqon kara:

- P60s or P45s
- waraaqaha mushaharka
- waraaqaha bangiga
- biilasha gaaska/korontada, biilasha Canshuurta Dawladda hoose, biilasha telefoonka (mobayl iyo laynka guriga, haddii ay ku qoran yihiin magacaaga iyo cinwaankaaga)
- akoonada ganacsiga sanadlaha ah
- qandaraasyada loo shaqeeyaha ama warqadaha xaqiijinaya shaqada
- warqado, biilal, shahaadooyin waxbarasho ama ururo la aqoonsan yahay
- baasaboor shaabadaysan oo xaqiijinaya soo gelidda UK
- tigidhada diyaarada ama tareenka oo xaqiijinaya soo gelidda UK.
- warqadaha xarumaha daryeelka, dhaqtarka qoyska ama isbitaalada, iyo sidoo kale ballamaha dhakhaatiirta

Haddeer way xadidan tahay inta dukumiinti ee aad iskaan gareyn karto kadibna aad gelin karto foomka codsiga ee onleenka ah. Hadii Xafiiska Arrimaha Gudaha uu u baahdo dukumiintiyo dheeraad ah oo la xiriira deggenaanshahaada UK, way kula soo xiriiri doonaan

kaana codsan adoonaan inaad keento. Uma baahnid inaad caddaysid muddadi aad joogtay UK oo dhan. Waxaad kaliya u baahan doontaa inaad cadeyn ka keentid mudddada cadeeneysa inaad xaq u leedahay Deganaanshaha Joogtada ah (5 sano oo aad degnayd UK) ama Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah (6-di bilood ugu danbeysay oo mar aad ka degtay UK).

Hadii aadan reer Yurub ahayn oo aad codsi u dirsaneyso EUSS waxaad u baahan doontaa inaad cadeyso xiriirka aad leedihiin qofka xubnaha qoyka rer Yurub ah ee ku jira codsigaaga.

Hadaadan awoodin inaad keento macluumaad kale ama caddayn tusinaysa degganaanshahaaga, Xafiiska Arrimaha Gudaha wuxuu sheegay inuu weli kaala shaqayn doono sidii loo go'aamin lahaa deganaanshahadaa UK.

Waxaa jira liiska hubinta oo ah doukumiintiyo iyo macluumaad faa'iido leh ah oo aad u isticmaali karto inuu kaa caawiyo diyaargarowgaaga codsiga.

## Hubinta dembiga

Waxaa lagu fari doonaa inaad cadeysid wixii xukun dembi ah ee ka muuqda diiwaankaaga dembiga ee gudaha UK iyo dibaddaba, ama xukunka ilmo kasta oo da'diisu u dhaxayso 18 ilaa 21, oo aad u gudbinayso codsi. Kuwaan waxaa laga hubin doonaa xogta danbiyada ee UK. Uma baahnid inaad cadeyso mid kamid ah kuwan soo socda: xukunadda aan u baahneyn in shaaca laga qaado ('xukunada dib laga tiro'), digniinta ('Digidda'), waxyaabaha baddelka u noqda maxkamadaynta, tusaale gaanaxyada xawaaraynta?

Waxaad weli xaq u lahaan kartaa inaad codsato Deganaanshaha Joogtada ah ama Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah hadii aad leedahay xukun dembiyeedyo maadaama kiis walba geys loo qiimeyn doono. Sikastaba aha ahaatee, waxaana laga yaabaa inay fikir wanaagsan tahay inaad raadsato talo sharciyeed madax banana kahor intaadan codsigaaga dirin, qaas ahaan hadii aad laheyd in ka badan hal xukun dembiyeed ama xarig dhan 12 bilood ama in ka badan. Waxaan soo gudbinay liiska la taliyaasha sharciga ee madaxa banaan.

## Ma lacag baa?

Waa bilaash in la codsato EUSS.

Sikastaba ha ahaatee, kharashyo ayay weli yeelan karaan qaybaha kale ee habraaca codsiga, sida isticmaalka adeega hubinta dukumiintiga iyo aqoonsiga ee xarumaha hawlaha khaaska ah, taas oo noqon karta £14.00 qofkiiba. Codsadayaasha aan ahayn Muwaadiniinta reer Yurub waxay sidoo kale u baahan karaan inay isticmaalaan xarumaha fiisaha UKVCAS si ay u xareeyaan xogtooda bayometriga iyada oo qayb ka ah habraaca codsiga. Waxaa jira ballamo bilaasha ah oo laga helo xarumaha wawawyn balse maadaama kuwan ay ku yaalaan kaliya magaalooyinka wawayn ee UK, waxay u baahan tahay qarash baabuur raac ah si loo tago ama, taas baddelkeeda bixi lacagta ballanta ee xarun fiisa oo deegaankaaga ku taala. Hadii aad ku jirto xaalad adag oo aadna awoodin inaad hesho talo socdaal iyo talo sharci bilasha ah, waa inaad bixisaa kharashka qareenka.

## Codsi ka soo dirista dibadda

Codsiyada waxaa laga soo diri karaa dibadda iyada oo la adeegsanayo App-ka iskaan gareeya Dukumiintiga Aqoonsiga iyo nidaamka codsiga onleenka ah. App-ka iskaan gareeya Dukumiintiga Aqoonsiga waxaa kaliya lagu isticmaali karaa baasabooro iyo Dukumiintiga Aqoonsiga qaran oo ansax ah oo leh lafta yar ee bayometriga ah oo ay is-qaadan karta. Codsadayaasha aan ahayn Muwaadiniinta reer Yurub, waxaad kaliya ka soo codsan kartaan dibadda idinka oo adeegsanaya App-ka iskaan gareeya Dukumiintiga Aqoonsiga hadii aad haysataan kaarka degenaanshaha oo bayometriga ah ama kaarka degenaanshaha rasmiga ah ee bayometrig ah ee lagu helay si waafaqsan Sharciyada EEA. Hadii aadan heli karin dukumiintiyadan, waxaad u baahaneysaa inaad la xiriirto Xarunta Xallinta Degganaanshaha ee EU si loo cadeeyo hadii aad xaq u leedahay inaad ku codsato cadeyn kale oo ka timid dibadda UK.

## Kala socoshada iimayl-kaaga natiijada codsigaaga

Si joogta u eeg iimayl-kaaga maadaama warqada oggolaanshaha ee Xafiiska Arrimaha Gudaha laguugu soo diri doono cinwaanka iimaylka ee aad ku qortay codsigaaga. Waa inaad sidoo kale eegtaa qeybaha ‘junk mail’ ama ‘spam’ ee iimaylka, maadama mararka qaar ay warqada oggolaanshaha halkaas ku dhici karto.

Waxay u badan tahay inay qaadato inta u dhaxeysa shan maalmood ama hal bil oo shaqo jirto inuu Xafiiska Arrimaha Gudaha kaga shaqeeyo codsigaaga haddii xog dheeraad ah aanan loo baahnayn. Hadii xog dheeraad ah loo baahan yahay ama codsigaaga uu isku qasan yahay, waqti intan ka dheer ayay qaadan kartaa. Waxaad wici kartaa lambarka Xarunta Xallinta Degganaanshaha EU ee Xafiiska Arrimaha Gudaha (0300 123 7379) si aad uga wareysato codsigaaga.

Markii aad hesho iimaylka oggolaanshaha, soo daawac isaga iyo warqada oggolaanshaha ama ku keydi sanduuqaaga keydka si aad uga tixraacdo mustaqbalka. Inkasta oo warqadan aysan cadeyn u ahayn xaaladaada, waxaad u baahan kartaa inaad tixraacdo xogta ku qoran warqada si aad u cusbooneysiiso xogta dijitaalka ah ee uu hayo Xafiiska Arrimaha Gudaha.

## Miyaan helayaa caddaynta Deganaanshaheyga Joogtada ah ama Deganaanshaheyga Ku Meel Gaarka ah?

Haddii lagu siiyo Deganaanshaha Joogtada ah ma heli doontid dokumeenti aad ku caddeyso midan, taas baddelkeeda waxaad heli doontaa degenaansho dijitaal ah oo aad ka heli karto bogga gov.uk portal. Hadaad u baahato inaad caddeyso degenaanshahaada, tusaale ahaan inaad u cadeyso loo-shaqeeye cusub ama mulkiile guri, waxaad siin kartaa lambarka lagu galo iyo xiriiriyaha bogga internet, si ay uga xaqiijiyaan internetka degenaanshahaada. Kama heli karaan macluumaad dheeraad ah oo adiga kugu saabsan xiriiriyhahan bogga internetka. Ilaa iyo laga gaaro 30 Juun 2021, Muwaadiniinta reer Yurub loogama baahno inay u muujiyaan degenaanshahooda dijitaalka ah loo-shaqeeye ama mulkiile guri maadaama aad wali adeegsan karto baasaboorkaaga ama kaarkaaga Dukumiintiga Aqoonsiga qaranka.

## Ma ka qaadan karaa rafcaan Go'aanka Xafiiska Arrimaha Gudaha?

Waxaa jira dhowr sababood oo aad u jeclaan lahayd inaad ka hor timaado go'aanka Xafiiska Arrimaha Gudaha. Sababaha ugu badan waa:

- Waxaa lagu siiyay Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah laakiin waxaad rumeysan tahay inaad xaq u leedahay Deganaanshaha Joogtada ah; ama
- Waxaa laguu diidey Deganaanshaha Joogtada ah ama Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah

Inta lagu jiro codsigaaga onleenka ah, waxaa sidoo kale lagu weydiin doonaa muddada aad si joogto ah ugu nooleyd UK. Hab-socodka codsiga ayaa markaas kuu sheegi doona haddii hubinta lambarkaaga Caymiska Qaranka ee otomaatiga ah laga arki karo shan sano oo deggenaansho joogta ah. Hadii hubintan aysan muujinin shan sanoo oo deggenaansho joogta ah, waxaad fursad u leedahay inaad soo xareyso cadeyn dheeraad ah si aad u muujiso inay tahay in laguugu deeqo Deganaanshaha Joogtada ah. Hadii aadan si joogta ah ugu noolayn UK shan sano oo isku xigta waxaad ku aqbali kartaa Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah inuu yahay natiijada saxda ah ee xaaladaada. Hadii hubinta ootamaatiga ah aysan kuu soo helin wax deggenaansho UK ah, waxaa laguu sheegi doona inaad soo xareyso cadeynta deggenaanshaha si aad u muujiso inaad xaq u leedahay midkood Deganaanshaha Joogtada ah ama Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah.

Hadii lagu siiyay Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah laakiin aad rumeysan tahay inaad xaq u leedahay Deganaanshaha Joogtada ah, waxaad u baahan doontaa inaad go'aansato haddii aad si guul leh racfaan uga qaadan karto go'aankan iyo haddii kale. Haddii aadan haysan caddeyn dheeraad ah oo aad ku muujiso shan sano oo deggenaansho joogta ah, waxaad dooran kartaa inaad aqbasho Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah marka horaba. Markaas kadib waxaad dib u codsan kartaa Deganaanshaha Joogtada ah haddii aad hesho macluumaad dheeraad ah oo caddayn kara degganaanshahaaga. Ka hor intaadan sidaa yeelin, waa inaad la xiriirtaa la taliyaha socdaalka ama Xarunta Xallinta Qorshaha Dejinta EU ee Xafiiska Arrimaha Gudaha.

Haddii kale, waxaad codsan kartaa dib u eegista go'aanka. Tani waxaa loo yaqaanaa dib u eegista maamulka. Codsiga waa in lagu soo gudbiyaa 28 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda go'aanka. Waxaa jira lacag khidma oo dhan £80 balse waase la soo celin doonaa haddii: a) codsiga uu guuleysto, ama b) haddii codsiga la diido sababtoo ah ansax ma ahan. Lacagta dib looma soo celin doono haddii dib-u-fiirinta ay guuleysato maadaama aad soo gudbisay macluumaad dheeri ah. Waxaad dib u eegis ku codsan kartaa adiga oo adeegsanaya foomka codsiga.

Qaab kale oo lagu diido go'aan aadan raali ka ahayn waa inaad racfaan ka dalbato First-tier Immigration Tribunal (Maxkamada Socdaalka ee Heerka Kowaad). Racfaanka laga qaadanayo maxkamada cadaalada wuxuu ka dhigan yahay in go'aanka Xafiiska Arrimaha Gudaha uu dib u eegi doono garsoore socdaal oo madaxbanaan kaas oo eegi doona xaaladaada iyo cadeynta aad gudbisay, si uu u go'aansado haddii uu ku raacsan yahay go'aanka Xafiiska Arrimaha Gudaha iyo hadii kale. Racfaanada maxkamada cadaalada waxay ku kacaan £80 hadii aad rabtid racfaanka inuu ku saleysnaado dukumiintiyadaada ama £140 hadii aad rabtid inaad shaqsi ahaan hadal ugu jeedisid garsooraha socdaalka.

Waxaa feker wanaagsan ah inaad kiiskaaga kala hadasho la-taliye socdaal oo aqoon leh ka hor inta aadan racfaan u gudbinin Maxkamada cadaalada si aad u fahanto suuragalnimada inuu guuleysto racfaankaaga. Halkan waxaad ka helin kartaa liiska la taliyaasha sharciga ee madaxa banaan ee laga yaabo inay ku caawiyaan.

Hadii laguu diido Deganaanshaha Joogtada ah ama Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah markaa waxaad u baahan doontaa midkood inaad dib u codsato, aad codsato dib u eegista maamulka ama aad racfaan ka xareysato Maxkamada Socdaalka ee Heerka Kowaad. Hannaanka aad raaci doonto wuxuu ku xirnaan doonaa sababta laguugu diiday. In deggenaansho laguugu diido nidaamka EUSS waa mid aad u xun balse haddii midaas ay ku qabsato waxaa feker wanaagsan ah in lala hadlo la-taliye socdaal aqoon leh. Halkan waxaad ka helin kartaa liiska la taliyaasha sharciga ee madaxa banaan ee laga yaabo inay ku caawiyaan.

## Shuruudaha aad ku sii haysan karto Deganaanshaha Joogtada ah ama Deganaanshaha Ku Meel Gaarka marka lagu siiyo

Si aad u haysato Deganaanshaha Joogtada ah waa inaadan ka maqnaanin UK muddo shan sano oo xiriir ah ama in ka badan maadaama ay xaaladaada deggenaansho dhamaan karto hadii aad ka maqnaato UK wax ka badan 5 sano. Hadii dembi laguugu helo, Xafiiska Arrimaha Gudaha wuxuu joojini karaa Deganaanshaha Joogtada ah ama waxay isku dayi karaan inay kaa saaraan UK. Marki laga soo tago labadan sababood waxaad sii heysan doontaa Deganaanshaha Joogtada ah – iyo xuquuda loogu noolaanayo UK sida aad hadda ugu nooshay – noolal ahan.

Si aad u sii heysato Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah, waa inaad si joogta ah u sii degnaato UK, fadlan akhri qeybteena ka hadasha deggenaanshaha joogtada ah si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Waa inaad sidoo kale hubiso inaad codsato Deganaanshaha Joogtada ah kadib markaad si joogta ah u degnaato UK shan sano ama ka hor inta uusan Deganaanshahaaga Ku Meel Gaarka ah dhicin. Hadii dembi laguugu helo, Xafiiska Arrimaha Gudaha wuxuu joojini karaa Deganaanshaha Ku Meel Gaarka ah ama waxay isku dayi karaan inay kaa saaraan UK.